



WARBIXINTA WAXQABADKA HAY'ADDA WADDOOYINKA DPL

JAN, FEB 2022

OFFICE OF THE CEO

PUNTLAND HIGHWAY AUTHORITY

Table of Contents

WARBIXINTA WAXQABADKA HAY'ADDA BISHA JAN,FEB 2022	2
1. WAXQABADKA UJEEDEKA 1AAD: HORUMARINTA MAAMULKA PHA	3
1.1 Waxqabadka Shaqooyinka Hormarinta Maamulka Iyo Maaliyadda	3
Evaluation)	5
2.0 WAXQABADKA UJEEDEKA 2AAD: SAHANKA IYO DAYACTIRKA JIDKA LAAMIGA AH EE AY FULINAYSO HAY'ADDA PHA	Error! Bookmark not defined.
2.1.1 Sahminta Burburka Jidka Garowe-Bosaso	6
2.1.2 Sahanka Ciidda Waddada Laacdheere-Rabbaable	6
3.1.1 Mashruuca Dayactirka 45 Buundo Bosaso-Kalabayr:	7
3.1.2 Mashruuca Dayactirka Buundooyinka Qayaadsame	7
3.1.3 Mashruuca Dayactirka Waddada Xaaji-khayr	8
3.1.4 Mashruuca Dayactirka Jidka Laamiga Middigar	8
3.1.5 Mashruuca Dayactirka 8da Buundo Garowe- Birta Dheer	8
3.1.6 Mashruuca Dhisidda Jidka Laamiga 14km Laacdheere-Rabaable	9
3.1.7 Mashruuca Dayactirka Jidka Jalam-Xarfo	9
3.2.1 Kormeerka Madaxweynaha & Guddoomiyaha Hay'adda	10
3.2.2 Dhagax Dhiga Jidka Qardho-Bander-Beyla	11
3.2.3 Dhagax dhiga waddada Kalabayr-Caluula	11
3.2.4 Calaamadaynta Jidka Laacdheere-Rabaable(Benchmarks)	11
3.3 Xarig Jarka Mashaariicda Dhamaatay & Daahfur Mashariic Cusub	12
3.3.1 Xarig Jarka Waddada Garowe-Falayryaale:	12
WAXQABADKA UJEEDEKA 5AAD: YARAYNTA SHILLALKA BAABUURTA	12
Xog Ururinta Xaaladda Badbaado Ee Waddada Garowe-Bosaso	12
1- Gooladaha ay dhirtu ku baxday oo keeni kara shilaka gaadiidka	13
3. Buburka Waddada Ee Garbaha	13
4. Laamiga meelaha Goddadku ka samaysmeen	14
WAXQABADKA UJEEDEKA 6AAD: XOOJINTA XIRIIRKA DANEEYAYAASHA	15
6.1 XOOJINTA XIRIIRKA WASAARADDA MAALIYADDA	15
6.2 XOOJINTA XIRIIRKA DADWEYNAHA	15
6.3 SAMAYNTA WEBSITE-KA IYO FACEBOOK HAY'ADDA	15

WARBIXINTA WAXQABADKA HAY'ADDA BISHA JAN,FEB 2022



KORMEERKA MADAXWEYNAHA PUNTLAND MASHAARIICDA DAYCTIRKA JIDKA GAROWE-BOSASO

HQ Office, Garowe, Puntland, Somalia, Email: pha.plstate@gmail.com
www.pha.pl.so

Hordhac:

Warbixinta billaha ee waxqabadka hay'adda waddooyinka waxay ka koobnaan doontaa waxqabadka hay'adda ee bilaha 1aad iyo 2aad 2022, waxay warbixintu kulansanaysaa waxqabadkii hay'adda iyo hormarkii laga gaaray shaqooyinkii qorshaysnaa labada bilood, waxaana isdultaag ku samayn doonaa dhinacyada hormarinta hay'adda, Maamulka iyo maaliyadda, sahammada, iyo shaqooyinka dayactirka waddooyinka.

Ujeedooyinka PHA Sannadka 2022

- 1- In la horumariyo Awoodda Maamulka iyo Maaliyadda Hay'adda, (**Management and financial capacity building**) iyadoo lagu dhaqmayo qiyamka hufnaanta, isla xisaabtanka iyo daahfurnaanta hay'adda.
- 2- In la horumariyo Awoodda Hay'adda ee Farsamada dhismaha iyo sahanka waddooyinka Puntland (Technical Capacity Building) iyadoo kor loo qaadyo Awoodda Dayactirka, Dhismaha, Naqshada, Sahanka iyo Shaybaarka.
- 3- Sahanka, Dayactirka iyo horumarinta jidadka laamiga wayn (Bosaso-Gaalkcayo & Garowe-Laascaanood) oo ah mashaariic ay fulinayso hay'adda PHA sanadka 2022.
- 4- Maamulka, kormeerka iyo dabagalka Mashaariicda dayactirka ee horumarinta Jidadka ay fulinayaan Qandraslayda Maxaliga ah iyo kuwa Caalamiga ah.
- 5- In la xoojiyo Xiriirka Hay'adda PHA ay la lahayd Hay'adda Caalamiga iyo deeq bixiyaasha , Dowladda iyo dadweynaha, lana dhiso sumcadda Hay'adda.

1. WAXQABADKA UJEEDEKA 1AAD: HORUMARINTA MAAMULKA PHA

1.1 Waxqabadka Shaqooyinka Hormarinta Maamulka Iyo Maaliyadda

1.1.1 Waxay hay'addu bishii jan, kala xadayn iyo shaqo qeexis u samaysay shaqaalaha qaybta maamulka iyo maaliyadda ee hay'adda, iyadoo qof walba loo sheegay waajibaadka shaqo ee leeyahay.

1.1.2 Waxay hay'addu sareedo maxamuud xaaji oo ka mid ah shaqaalaha qaybta maamulka iyo maaliyadda ka dhigtay khasnajiiga hay'adda, iyadoo qaybta maamulka iyo maaliyaddu aysan horay u lahayn qof khasnaji ah.

1.1.3 Waxay sidoo kale bishii jan, Maxamuud Sulaymaan si ku meel gaar ah loogu magacaabay madaxa qaybta iibka .

1.1.4 Waxaa bishii Feb, qiimeyn lagu sameeyey awoodda maamulka iyo maaliyadda, waxayna hay'addu u yeertay laba khabiir dhanka maamulka iyo maaliyadda, 1-Abshir Maxamed Maxamuud 2-MIIG, si ay qiimayn ugu sameeyaan maamulka iyo maaliyadda hay'adda, isla markaana ay talooyin uga bixiyaan, meelaha loo baahan in laga xoojiyo qaybta maamulka iyo maaliyadda .

1.1.5 Waxay hay'addu bilihii jan, feb dayactir ku samaysay qaybo ka mid ah xafiisyada hay'adda oo dayac badan ka muuqday sida hoolka shirarka hay'addu oo markaa ahaa mid gabi ahaa mid aan u suubanayn in shirar lagu qabsan karo, waxaa sidoo kale dayactir iyo qurxin lagu sameeyey xafiiska guddoomiyaha, iyo xafiiska injineerada .

1.1.6 Hay'adda waddooyinka waxay u isticmaali jirtay nidaamka xisaabaadka Excelka, waxaase hadda lagu soo kordhiyey in la isticmaalo Quick book oo isagu ah mid ka casrisan Excel-ka.

1.1.7 Shaqaalaha hay'adda waddooyinku waxay bishii lasoo dhaafay si buuxda u heleen xuquuqdii mushahaarka ay ku lahaayeen dawladda Puntland. Waxay sidoo shaqaaluhu heleen gunno hawleedkii ay qaadan jireen oo horay ula socon jiray mushahaarka, balse bishii lasoo dhaafay iyo wixii hadda wixii ka dambeeyaba uu bixinayo toos u bixinayo xafiiska PHA.

1.1.8 Hay'addu waxay bixisay kharashaadka xafiiska sida korantada, biyaha, internet-ka shidaalka iyo agabka xafiiska(stationary).

1.1.9 Waxaa bishii Feb, 2022 , hay'addu diyaarisay miisaanniyad dhan \$1,171,132.00, taas oo isugu jirta hormarinta hay'adda iyo dayactirka jiddadka, Miisaaniyadan ayaa ah mid kulansanayso kana jawaabi karta baahiyaha hormarinneed ee tayaynta awoodda hay'adda, iyo dayactirka jiddadka Puntland.

1.1.10 Waxay hay'addu dirasad qiimayn ah ku samaysay awoodaha gudaha ee maamulka iyo maaliyadda iyo awoodda fulinta mashaariicda iyo barnaamijyada hay'adda.

1.2 Waxqabdkka Horumarinta Qorshaha iyo Dabagalka (Planning Monitoring and Evaluation)

1.2.1 Daahfurka Qorshaha 5-ta sanno ee hay'adda:

01-dii Bisha February, waxay hay'addu samaysay madal ay kusoo bandhigaysay qorshaha 5ta sano ee hay'adda waddooyinka, iyo kulankaas lagu casumay daneeyayaasha kala duwan ee hay'adda, sida Dawladda, hay'adda caalamiga ah , iyo ururada bulshada, kulankaas oo ka dhacay oo hoolka shirarka wasaaradda qorhaynta.



1.2.2 Diyaarinta Qorshaha Sannadka 2022

Waxaa bilawgii bishii February, guddoomiyaha hay'addu diyaariyey qorshaha hawlqabadka hay'adda ee sannadka 2022 .

2.0 Waxqabadka Ujeedka 2aad: Sahanka Iyo Dayactirka Hay'adda PHA Qabat

2.1.1 Sahminta Burburka Jidka Garowe-Bosaso

28-Feb 2022, waxay koox injineero ah oo ka koobnaa 5 qof, oo uu hogaaminayo Lead engineer-ka Hay'addu sahmin ku samayeen burburka soo gaaray jidka Garowe-Bosaso, iyadoo sahankan loo qaybiyey laba qaybood A- Garowe-Qardho iyo B- BosasoQardho. Warbixinta sahankan oo qaatay muddo laba isbuuc ah ayaa asaas u noqon doona qorshaha dayactirka jidadkaas 2022.



2.1.2 Sahanka Ciidda Waddada Laacdheere-Rabbaable

Hay'addu waxay dirtay 05-Feb,2022, tiro injineero iyo farsamo yaqaano ah kuwaas oo sahmin ku sameeyey goobaha laga qaadayo ciidda lagu dhisayo jidka LaacdheereRabaable, iyadoo ciido kasoo qaaday dhawr goobood oo kala duwan, ugu dambaynna mariyey shaybaarka hay'adda si looga doorto nooca ciida ee ugu haboon in jidka la dhigo.



2.2 Waxqabadka Dayactirka Jidka Laamiga Ah

2.2.1 Godddad Buuxinta Garowe-Qardho:

Hay'adda waddooyinku waxay bilihii jan,feb goddad buuxin ku samaysay jidka deer ee laamiga ah ee isku xira Garowe iyo Qardho, iyadoo hadda jidkaasi uusan lahayn wax goddad ah, isla markaana gaadiidka ku safray waddadaas aysan kala kulmayn wax dhib ah. Waxaa sidoo kale hay'addu godad buuxin ku samaysay qardho ilaa guud cad oo qiyaastii gaaray ilaa 15km.



3.0 WAXQABADKA UJEEEDKA 3aad: DAYACTIRKA JIDKA LAAMIGA AH SI HAB QANDARAASYO AH

3.1 Waxqabadka Mashaariicda ay Maalgalinayso

Dawladda Puntland:

3.1.1 Mashruuca Dayactirka 45 Buundo Bosaso-Kalabayr: Mashruucan ayaa waxaa dib u dayactir lagu samaynayaa 45 Buundo, waxaana shaqadiisa ilaa hadda la qabtay 80% waxaana ku baxaysa lacag dhan \$863,500.00, Mashruucan ayaa shaqadiisa la qabtay 100%



3.1.2 Mashruuca Dayactirka Buundooyinka Qayaadsame Mashruucan oo shaqadiisa la qabtay 70% ayaa waxaa lagu dayactirayaa buundooyinka qayaadsame oo labo ka mid ah lagu sameeyey dib udhisid(Reconstruction), halka sadex buundo oo kale lagu samaynayo dib u dayactir(Rehabilitation) Waxaana ku ku baxaysa lacag dhan \$670,000.00 .



3.1.3 Mashruuca Dayactirka Waddada Xaaji-khayr

Mashruucan oo shaqadiisa la qabtay 60% ayaa waxaa dib u dhis lagu samaynayaa 4 Culverts waxaa sidoo kale dib u hagaajin(Rehabilitation) lagu samaynayaa 4 birij (Culverts), Waxaana ku baxay kharash dhan \$220,000.00 .



3.1.4 Mashruuca Dayactirka Jidka Laamiga Middigar
Mashruucan ayaa waxaa dib u dhisid(reconstruction) lagu samaynayaa 33 buundo , waxaa sidoo kale dib u hagaajin(Rehabilitation) lagu samaynayaa 11 Buundo ,iyo dhigista 9km oo laami ah . Mashruucan ayaa shaqadiisa 70% la qabtay Waxaana ku baxaysa lacag dhan \$1,650,000.



3.1.5 Mashruuca Dayactirka 8da Buundo Garowe- Birta Dheer

Mashruucan oo shaqadiisa lasoo gabagabeeyey 100% waxaa lagu dayactiray ilaa 8 buundo inta u dhaxaysa Garowe ilaa Birta dheer, waxaana ku baxday lacag dhan \$120,000.00 .



3.1.6 Mashruuca Dhisidda Jidka Laamiga 14km Laacdheere-Rabaable

Mashruucan ayaa waxaa dib u dhisid cusub lagu samaynayaa 14km oo ah inta u dhaxaysa Laacdheere ilaa Rabaable, iyadoo gabi ahaanba la xaaqayo waddada hadda, dibna loo saarayo laami cusub, waxaana ilaa hadda shaqadiisa la qabtay 20% ,Waxaana ku baxaya kharash dhan \$2,100,000 .



3.1.7 Mashruuca Dayactirka Jidka Jalam-Xarfo

Mashruucan oo ay dawladda Puntland ku guulaysatay in uu dib u bilaabmo ayaa lagu dayactiryaa jidka laamiga ee Garowe-Galkacyo, waxaana phase-ka 1aad lagu dhisayaa 80km oo u dhaxeeye Jalam ilaa Xarfo, waxayna dawladda puntland kaga qaybqaadanaysaa \$1,800,000 (Contribution).



3.2 WAXQABADKA KORMEERADA AY HAY'ADDU SAMAYSAY BILIHII JAN,FEB 2022

3.2.1 Kormeerka Madaxweynaha & Guddoomiyaha Hay'adda

Madaxweynaha Dawladda Puntland iyo wafdi balaaran oo uu hogaaminayo ayaa 19-Feb, kormeer shaqo ku sameeyey mashaariicda socota ee jidka laamiga isku xira Garowe-Bosaso, iyadoo guddoomiyaha hay'adda PHA uu madaxweynaha uga warbixiyey halka ay marayaan dhamaan mashaariicda shaqo ee ka socda jidka garowe-Bosaso.

1-Mashruuca Dayactirka waddada middigar

2-mashruuca dayactirka xaaji khayr

3-mashruuca dayactirka buundada qayaadsame

4-mashruuca dayactirka buundooyinka Bosaso-Kalabayr



KORMEERKA MADAXWEYNAHA MASHRUUCA MIDIGAR



KORMEERKA MADAXWEYNAHA XAAJI KHAYR



KORMEERKA MADAXWEYNAHA QAYAADSAME



KORMEERKA MADAXWEYNTA BUUNDOOYINKA
BOSASAO-KALABAYR

3.2.2 Dhagax Dhiga Jidka Qardho-Bander-Beyla

20-Feb,2022 Intii uu socday safarka madaxweynaha iyo wafdigiiisu oo wehelinayey guddoomiyuhu waxaa madaxweynuhu dhagax dhigay sahanka waddo cusub taas oo isku xiraysa magaalooyinka Qardho iyo Bander-Beyla , oo waddadaas oo dharekeedu dhanyahay 242km, waddadaas oo bulshada deeganadaas ku nool ay baahi weyn u qabeen, isla markaana ka qaybqaadanayso hormarka dhaqaalaha dalka .



3.2.3 Dhagax dhiga waddada Kalabayr-Caluula

Madaxweynaha Dawladda Puntland ayaa 21-feb-2022, waxa uu dhagaxdhigay waddada Kalabayr-Caluula. Jidkan sahankiisa la dhagax dhigay ayaa ah mid ahmiyad weyn uleh bulshada Puntland.



3.2.4 Calaamadaynta Jidka Laacdheere-Rabaable(Benchmarks)

Waxaa 13-Feb, koox injineero ah u baxeen jidka Laacdheere-Rabaable, iyagoo jidka ku sameeyey calaamadaynta(Benchmarks) .



3.3 Xarig Jarka Mashaariicda Dhamaatay & Daahfur Mashariic Cusub

3.3.1 Xarig Jarka Waddada Garowe-Falayryaale: 13, Feb. 2022, waxaa madaxweyne ku xigeenka dawladda Puntland uu xariga ka jaray waddada garowe-falayryaale, waddadan xariga laga jaray ayaa ka mid ah 9 mashruuc oo dawladda Puntland si isku tashi ah u waddo.

Waddadan ayaa waxaa ku baxay kharash dhan \$329,906.00 , waxaana dhismaha ee fulisay shire construction Company.



3.3.2 Heshiiska Dhismaha Waddada Laacdhere-Rabaable:

Hay'adda waddooyinka DPL, 06-Jan-2022, waxay daahfurtay mashruuca dayactirka iyo dhismaha jidka Laacdhere-Rabbaable, kaas oo dhererkiisu dhanyahay 14km, iyadoo lacagta shaqada lagu qabanayo ay dhantahay \$2,100,000 (laba milyan iyo hal boqol oo kun oo daalar).

Waxaana mashruuca heshiis lagu galay shirkadda Kebarco Construction Company iyadu fulinayso, halka ay hay'adda PHA, ay kormeeri doonto shaqada qandaraasluhu qabanayo .



WAXQABADKA UJEEDEKA 5AAD: YARAYNTA SHILLALKA BAABUURTA

Xog Ururinta Xaaladda Badbaado Ee Waddada Garowe-Bosaso

Waxaa 29-Feb 2022, xarunta dhexe ee hay'adda ka ambabaxay agaasimaha waaxda badbaadada waddooyinka, Qaasim Cabdulqaadir iyo injineer caalim, kuwaas oo xog ururin ku sameeyey xaaladda badbaado ee waddada Garowe-Bosaso.

Kooxda xog ururinta sameeyey waxay xaaladda badbaado ee jidka u qaybiyeen 4 qaybood.

- 1- Gooladaha ay dhirtu ku baxday oo keeni kara shilaka gaadiidka
- 2- Buundooyinka jajaban ee shillalka keeni kara
- 3- Waddooyinka dhinacyada ka burburay ee shillalka keeni kara
- 4- Laamiga meelaha goddadku ka samaysmeen

1- Gooladaha ay dhirtu ku baxday oo keeni kara shilka gaadiidka

From Garowe to Bosaso	Gooladaha dhirtu ku baxday Dherer / Balac	Faahfaahinta
1	Goolada 22aad	Dhirta oo wadada soo gashay Dhereka 50m
2	Goolada Sinujiif	Dhirta oo wadada soo gashay Dhererka 67m
3	Goolada salaama	Dhirta oo wadada soo gashay Dhererka 70m
4	Yaka Yaka	Dhirta oo wadada soo gashay Dhererka 110m
5	Goolada Sanjilbo	Dhirta oo wadada soo gashay Dhererka 69m
6	Isbaarada Ceeleey	Dhirta oo wadada soo gashay Dhererka 108m
7	Ceeleey iyo Sheerbi dhexdooda	Dhirta oo wadada soo gashay Dhererka 57m
8	Xido ilaa Waaciye	Dhirta oo wadada soo gashay Dhererka 175m
9	Alxamdulilaah	Dhirta/Dhereka 210m

2- Buundooyinka Jajaban ee shilka keeni kara

Garowe to Bosaso	Buundooyin jajaban (culvert) Dherer / Balac Gudo Depth	faahfaahin
1	Buundada Waabo/ Culvert Laamiga garbaha ka qodmay	Culvertigu wa dhaacantahay Garbaha qodmay waa 414x1.2 depth
2	Dalsan	Garbaha qodmay waa Dhere 110x1m depth
3	Xaaji Khayr	Buundo Qodan / Culver 1.4m depth Waxay keeni kartaashil gaadiid
4	Sanjilbo	Buundo /Culvert Qodantay
5	Toga Ceeldaahir	Culvert labada dhinac ka duntay
6	Toga Ceeldaafaar	Culvert aasantay
7	Dalcada Dureera	Buundo duntay
8	Kalabayr	Culvert tuubadii bolashay ilaa ay go'day
9	Togga Laaso dawaco	Culvert la buuxiyay oo tuubadii laga saaray

3. Buburka Waddada Ee Garbaha

Garowe to Bosaso	Waddada dhinacyada ka burburtay	Warbixin
1	Goolada 22aad	Wadada garbaha ka jajabtay 57m x 1.8m
2	Dalcadda 22aad	Garba Wadad oo jajabay 4000m x 1.2 m
3	Dalsan	Garbaha burburay 90m x 1.2m x 2.3 depth
4	Xaaji khayr	Garbaha burburay 117m x 1.4m x 1.8 depth
5	Sanjilbo	Garbaha burburay 198m x 1.2
6	Ceeleey iyo Sheerbi dhexdooda	Burbur Garabka midig 76m x 0.5m balac ah
7	Duleedka Carta	Garbaha Qodmay 105m x 1m x 1m depth
8	Jiingada	Garbaha Qodmay 115m x 1.5m x 0.4m depth
9	Area kalabayr	Garbaha Qodmay 67m x 1m x 0.7m depth

4. Laamiga meelaha Goddadku ka samaysmeen

Garowe to Bosaso	Meelaha godadkka/jajaban Dherer / Balac/Gudo Depth	Faahfaahin
1	Guud cad	Godad/Potholes Balac:- 40-50cm Gunta 10-20cm
2	Ceeleey	Godad/Potholes Balac:- 20-30cm Gunta 10-20cm
3	Sheerbi ilaa Xido	Godad/Potholes Balac:- 40-50cm Gunta/depth 10-20cm
4	Xido ilaa waaciye	Godad/Potholes Balac:- 45-60cm Gunta/depth 15-20cm
5	Dalwayn	Godad/Potholes Balac:- 45-60cm Gunta/depth 15-20cm

Buundooyinka Xajiyaashu Ka



Gooladha Dhirtu kusoo baxday



WAXQABADKA UJEEEDKA 6AAD: XOOJINTA XIRIIRKA DANEEYAYAASHA

Ujeedo: In la xoojiyo Xiriirka Hay'adda PHA ay la lahayd Hay'addaha Caalamiga iyo deeq bixiyaasha , Dowladda iyo dadwaynaha, lana dhiso sumcadda hay'adda.

6.1 XOOJINTA XIRIIRKA WASAARADDA MAALIYADDA

Hay'adda waddooyinku waxay xoojisay xiriirkii ay hay'addu la lahayd wasaaradda maaliyadda, kaas sannadihii u dambeeyey xumaa, taasina ay kaliftay in ay hay'addu waydo dhaqaalahii. Waxaa hadda fiican xiriirka labada hay'addood ee dawlga ah ay leeyihiin .

6.2 XOOJINTA XIRIIRKA DADWEYNAHA

Hay'adda waddooyinku iyadoo ka duulaysa in ay dadweynaha Puntland ugu shaqayso si daahfuraan leh, isla markaana dadweynuhu ula socdaan shaqooyinka ay hay'addu u hayso bulshada, waxay hay'addu si jooqta ula wadaagtaa bulshada meelaha ay marayaan shaqooyinka ay hay'addu waddo.

6.3 SAMAYNTA WEBSITE-KA IYO FACEBOOK HAY'ADDA

Hay'addu waddooyinku waxay bishii Jan-2022, samaysay Website iyo Facebook ay hay'addu leedahay oo ay kusoo gudbisoo shaqooyinka iyo hawlaha ay hay'addu gacanta ku hayso, maadaama xiligaan ay bulshadu aad u isticmaasho baraha bulshada, sidaa darteedna waxaa lagama maarmaan in hay'addu ay halkaas kusoo gudbisoo warbixinnada, muuqaalada iyo kullamada hay'adda .

HQ Office, Garowe, Puntland, Somalia, Email: pha.plstate@gmail.com

www.pha.pl.so